**Jaaliyadda Sacad Mouse ee reer Norway: Tacsi iyo Cambaarayn Xukuumadda Siilaanyo shaqaaqadii Seemaal.**



Marka hore waxaan aad aad uga xumahay dilkaaas dhacay, dadkii ku geeriyoodayna (labada dhinacba) Eebbe naxariistisa janno haka waraabiyo, ehladoodii iyo inagaba (gudo iyo debadba) Eebbe samir iyo iimaan ha inaga siiyo. Aamiin. Dadkii dambigaas gaystay ee abuuray dhibaatada intaas leeg ee dad aan waxba galabsan loogu aaro oo guryahoodiina ka barakacaan, waa in la soo qabtaa oo abaalkoodii laga waraabiyo.
Waxaanan tageersanahay sidii quruxda badnayd ee Salaadiintii Sacad Muuse uga haldleen dhacdadaas foosha xun. Waxaanan ka xunahay oon cambaaraynana dad badan oo arrintan si fool xun uga hadlay.
Marka labaad waxaan si kulul oo aad ah u cambaaraynayaa talaabadii foosha xumayd ee Dawladdu ka qaaday dhacdadaas. Tallabooyinka ay qaadeen masuuliyiinta arrintaas loo xilsaaray waxay ahaayeen kuwo khaldan oo isugu jira xadhig iyo xilk-qaadis ku timid codsi iyo shuruud ka timid dhinaca kale.
Dad aan waxaba galabsan ee la xidhxidhay waxaa ka mid ah Xaaji Abiib Diiriye oo maalin ka hor Xajka ka soo noqday, iyo salaadiin (oo uu ku jiro suldaan dhaawac qaba), Culimaa'udiin, waxgaradkii, dhalin yaro fara badan oo waxa kaliya ee loo haystaa waxaad tihiin REER XAREED oo lala xidhiidhinayo dilkaas foosha xun. Qofka waxaa la xidhaa marka dambigaas la baadho ee ay ku caddaato inuu si uun ugu luglahaa. Haddaba dilku wagiiba waa dhici jiray inta aadmuhu jirana waa dhici doona oo wax inagu cusub maaha. Laakiin qaligeed lama arag lamana maqal dawladdii oo intay dhaaftay ciddii ay tuhmaysay ee ay ahayd inay iyada ku horreyso oo ay wax weydiisu illayn waxaa muhiim ah in talaabada ugu horeysaa ay noqoto sidii loo heli lahaa ciddii waxan geysatay oo loo diro waxgaradkii si loo hubiyo arrinta. Taas lama samayn ee waxaa ku dhacay faro-ka nax iyo jilicsanaan iyo baqdin? oo intay Gabiley xawaare ku dhaafeen ayay tegeen Dilla oo lagu soo go'aamiyay talaabooyinkaas kor ku xusan iyo in Taliya Guud ee ciidamada xilka laga qaado iyo inaan ciidamada qaranka la keeni karin deegaanka shaqaaqadu ka dhacday si loo kala dhex dhigo labada beelood oo aanay ficil aargoosi ahi u dhicin. Haddaba ciicamadii qaranka waxay madaxtooyadu amartay inayna dhaafi kari magaalada Gabiley kadib markuu Wasiirka arimaha guduhu u gudbiyay awaamiirtii iyo shuruudihii oo ka soo qaaday Dilla.
Tallaabada ciidanka loogu diiday inuu kala dhex galo labada beelood waxay keenatay in beeshii laga dilay 3da qof inay weerar aargoosi ah ku soo qaadaan deegaanka Buqdhada oo halkaas lagu dilay wiil 23 jir ah beerihii iyo guyihiina la gubo, xoolihiina la dhaco(sidaan warku sheegayo) dadkii iyo duunyadii wixii soo hadhay u barakayn dhinacaas iyo Kabaab iyo Booc oo ay hadda ku il daranyihiin. Hadday dilkaas ogaayeen waxay u diyaar garoobi lahaayeen isdifaac iyo dagaal. Laakiin waxaa halkaas ka muuqda inay ahaayeen war-moog oo aanay waxba iyagu lug ku lahayn dhacdaas. Gafkaa iyo khasaaraha halkaas ka dhacay waxay dushiisa saarantahay marka koowaad Dawladda dhexe ee Siilaanyo marka hoos loo dhaadhaco taadigaas waxaa ka mas'uula oo aan u haysanaa wasiirka arrimaha gudaha oo halkii uu si cadaalad ah arrinkaas u gali lahaa garab dhinac saaray, dhinacii kalana Xadhig, Xil-ka-qaadis, dhaafdhaaf iyo baro-kicin kula kacay.
Arrintani waxay horseedaysaa in reer waliba marka qof laga dilo beeshii kale cidday rabto farta ku fiiqdo oo ay tidhaahdo hala noo hebel xidho hebelna xilka halaga qaado, sababta oo ah arrintan nalagula kacay waxay noqonaysaa sharci oo cid walba qabata oo weey soconaysaa oo cid walba xilkuu doono ha hayee waa in la xidhaa markay cid ay isu beel yihiini cid dhisho. Taas buuga ayaan ku qoranay ee xukuumadda Siilaanyo ha ogaato illayn iyadaa sharciyaysaye.

Xadhiga Abiib Timacadde iyo Xil-ka-qaadista General Nuux Taani waxay anaga nooga dhiganyihiin Siilaanyo oo bilaa dambi lagu xidhay xilkiina looga qaaday. Waxaan moodanay in ammaanka qofka dawladdu masuul ka tahay laakiin hadda waxay u muuqataa siday arrimuhu u socdaan inayna masuul ka ahayn ee ciddii wax gaysataa loo raacayo qof kasta oo ay isu beel yihiin. Cajiib oo cajiib.  Arrinkan wasiirka arrimha guduhu ku kacay waxay noola muuqataa arrin caadifadi ku jirto mana aqbalayno. Shaaqadii Kalshaale ee u dhaxaysay Beesha Siilaanyo ka soo jeedo iyo beesha ka bariyaysa sidii wax looga qabtay ee loo galay iyo sida arrintan loo asiibay waa laba kala duwan. Kalshaale ciidamadii qaranka ayaa loo diray oo kala dhex galay oo dhiig dambe inuu daato kala badbaadiyay, dhimasho iyo dhaawacba ciidamadii qaranka way ku timid. Waxaa loo diray gurmad isugu jira Salaadiintii Somaliland oo dhan, Guurtidii JSL, Culimaa'udiinkii iyo wax-garadkii ummad. Halka dhinaca kale wax ciddii wax-garadkii beel ka mid ah la wada xidhxidhay, ciidankii qaranka ee loo diray inuu kala dhex galo Gabiley ma dhaafi kartaan lagu amray, Guurti iyo cid kale oo loo dirayna aanay jirin haba yaraatee, marka laga reebo laba wasiir oo yar yar oo caadifadaysan.
Haddaba waxaan ka codsanaynaa Madaxweynaha inuu tallaabooyinkan hoos ku xusan:

1. in maxkamad la horkeeno ciddii dilka labada dhinac gaysatay,
2. in xabsiga laga sii daayo cidda aan dambi lahayn ee sifaha sharci-darada ah loo haysto,
3. in si deg deg ah loo soo afjaro muranka dheeraaday ee ka dhexeeya labada beelood,
4. in dawladu sheegto sababta keentay xadhiga Xaaji Abiib Diiriye isla markii uu ka soo laabtay Xajka.
5. Inay noo caddayso sababta keentay in taliyihii ciidanka qaranka, oo ah hay'adda kaliya ee si fiican u taabi gashay, in codsi qof ka yimid loogu bedelo. Subxaan!

Waxaan aad u dhaliilnay aamusnaanta golayaasha qaranka, gaar ahaan kuwa ku ka soo jeeda Hargeisa iyo Gabiley ee arrintani khusayso.

**Liiska Jaaliyadda:**

1. 1. Ahmed Abdullahi Obsiye
   2. Jama Ali Osman
   3. Omar Darood Hassan
   4. Mohamed Egeh Cute
   5. Abdulqadir Odowa Awale
   6. Mohamed Yousuf Guleid
   7. Abdisalam Aw Isse Maaweel
   8. Sh. Mohamoud Abdillahi Isse
   9. Mohamed Tahar Sulub
   10. Isse Farah Elmi
   11. Ali Abdillahi Bulhan
   12. MoAhmed Maaweel
   13. Ibrahim Daud
   14. Ismail Cadduur
   15. Mustafa Tahar Sulub
   16. Abdirahim Omar
   17. Mohamed Difoo
   18. Mohamed Abdillahi Cade
   19. Ali Mohamed Nour (Ali iid)
   20. Awal Ahmed Abdullahi
   19. Abdi-amin Dahir Abdullahi
   20 Ahmed Jibril
   22. yousuf Mouse
   23. Abdi Muhumed Madar (Abdi Gujis)
   24. Abubakar Haybe
   25. Ahmed Ibrahim Ainan
   26. Abdirasak Ibrahim Ainan

27. Ismail Osman Otorosee
28. Hamsa Foodyacay
29. Hussein Omar
30. Ismail Qase
31. Hassan Looyar
32. Abiib Abdillahi
33. Ahmed Hashi
34. Abdillahi Mohamed Ali
35 Ahmed Mohamoud Samatar
36. Mubaarek Sharif Ali-abuu-shanaf
37. Abdi Nur (Dheereeye)
38. Abdiqadir Ibrahim Ainan
39. Hassan yousuf Guleid
40. Awil Ahmed Geele
41. Abdullahi Sh. Daud
42. Abdillahi Darod Hassan
43. Abdi Koosaar Awad
44. Mohamed Koosar Awad
45. Mohamed Habarwaa
46. Axmed Mohamed Madar
47. Sulieman Mohamed Obsiye
48. Khalid Xassan Tamuuje
49. Mukhtar Aliyare
50. Mohamed Omar (Bensel)